



FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
WADAJIR DISTRICT COURT
MOGADISHU-SOMALIA



Summad: MDWAD/39/2022

TR. 10/01/2022

UJEEEDO:- SUGITAAN DHAXALKOOB, CADEYN TARIKO IYO WAKAALADO.

Maanta oo ay taariikhdu tahay 10/01/2022, Waxaa maxkamadda Degmada Wadajir Hor Yimid Markhaatiyaasha kala ah:-

1-) **Cali Xuseen Cawaale**, Somali ah, Ku Dhashay Hobyo, Sanadkii 1961, Ina Xaawo Xasan Faarax, oo sita . Somali Passport No P00894420.

2-) **Abshir Macalin Abuukar**, Somali ah, Ku Dhashay Jowhar, Sanadkii 1969, Ina Gure Hilowlle Xasan, oo sita. Somali Passport No P00444311.

Waxayna si Wadajir ah Maxkamadda Horteeda uga Caddeeyeen in uu geeriyooday Marxuum la oran jiray **MARXUUM C/QAADIR KHEYRE CALI**, kuna geeriyooday Nairobi Sanadkii 2006, Waxay kaloo Markhaatiyaashu caddeeyeen in Marxuumka Aabihiis iyo Hooyadiis ay Ka geeri horeeyeen, Wuxuuna ifka uga tagay oo dhaxlaya 1, Xaas, 3, Gabar, Iyo 3, Casaba ah oo Marxuumka ku Hooyo Ku aaba ah Waxayna kala yihiin sidan soo socota:-

DADKA:-

1-Istaahil	Axmed	Yuusuf	Degan Xamar	Dhalatay 1977	(Xaaskii Marxuumka)
2-Suweys	C/qaadir	Kheyre	Degan Xamar	Dhalatay 1992	(Gabadhii Marxuumka)
3-Farxiyo	C/qaadir	Kheyre	Degan Xamar	Dhalatay 2002	(Gabadhii Marxuumka)
4-Ifraax	C/qaadir	Kheyre	Degan Xamar	Dhalatay 1998	(Gabadhii Marxuumka)
5-C/Ilaahi	Kheyre	Cali	Marxuum	(Casabo)	
6-Naciimo	Kheyre	Cali	Dagan USA	Dhalatay 1963	(Casabo)
7-Saciido	Kheyre	Cali	Dagan Sweden	Dhalatay 1959	(Casabo)

Intaas Kadib Waxaa Geeriyooday **MARXUUM C/LLAAHI KHEYRE CALI**, Kuna Geeriyooday Shalanbood Sanadkii 2007 Aabihiis iyo Hooyadiis ay Ka geeri horeeyeen Xaasna Muusanqabin Wuxuuna ifka uga tagay oo dhaxlaya 2, Wiil 1, Gabar, Waxayna kala yihiin sidan soo socota:-

B-)BAH:- FAADUMO KHALIIF XANAF “Marxuumka Wee Ka geeri Horeesay”

1-Maxamed	C/Ilaahi	Kheyre	Dagan UK	Dhashay 1968	(Wiilkii Marxuumka)
2-Saadaq	C/Ilaahi	Kheyre	Dagan Xamar	Dhashay 1968	(Wiilkii Marxuumka)

T-)BAH:- KHADIJO KULAN XUSEEN “Marxuumka Wee Ka geeri Horeesay”

1-Safiyo	C/Ilaahi	Kheyre	Dagan Xamar	Dhashay 1963	(Gabadhii Marxuumka)
----------	----------	--------	-------------	--------------	-----------------------

Waxay kaloo Markhaatiyaashu Caddeeyeen in aysan jirin Cid kale oo Marxuumka dhaxleysa oo nool ama Geeriyootay haday noqon laheyd Asal Ama Farac.



HANTIDA LAGA DHAXLAAYO MARXMUUMKA.

Waxay kaloo Markhaatiyaashu caddeeyeen in **MARXUUM C/QAADIR KHEYRE CALI** uu ifka uga tagay Guri Dhisan oo ku yaala xamar Degmada (H/wadaag) Lehna **Soborlog No. 11/38/2021, Tr.1/8/2021 Rasiid No. 11289 Tr.1/8/2021** Kana Soo Wada Baxeen D/hoose Ee Muqdisho Cabirkisu Dhan yahay (13.50 X13.50)- M Loot No. 335 Soodimihiisuna Kala Yihiin Waqooyi iyo Galbeed Waxaa Kamara Jidad Inta Kalana Waxaa Kaxiga Dhul dad Ahna Diplicat .

WAKAALADO

Waxay Maxkamadda Degmada Wadajir Sugaysaa In Dhaxaltooyada Kala ah 1-Suweys C/qaadir Kheyre,2-Farxiyo C/qaadir Kheyre, 3- Ifraax C/qaadir Kheyre ay Soo Wakiisheen Istaahil Axmed Yuusuf Sida Ku Cad

1-) Wakaalad Ref No.22037/21 Tr.19/03/2021 Kana soobaxday Xafiska Nootayo Dayax Una saxiixay Dr. Aadan Jim'ale Mohamed. 2-) Wakalaad Ref No. XNQ/69/2021 Tr.21/03/2021 Kana Soobaxday Xafiska Nootaayo Qaanuuni Una Saxiixay Dr.C/ramaan Maxamed Xasan. Sidoo kale Dhaxaltooyada Kala ah 1- Saciido Kheyre Cali (Saida Haaji Keire) 2- Naimo Kheyre Ali 3- Maxamed C/llaahi Kheyre ay Soo Wakiishen Saadaq C/llaahi Kheyre Sida Ku Cad 1-) Wakalad Ref No.SOMEMB/FR/WAK/332/21 Tr. 16/10/2021 Kana Soobaxday Safaarada Somaliya Ku Leedahay Dalka France Una Saxiixay Qunsulka Safaarada Waxaana. 2-) Wakaalad Ref No. 615-1569SN Tr.30/12/2021 Kana Soobaxday Safaarada Somaliya Ku Leedahay Washington Una Saxiixay Qunsulka Safaarada Waxaana Wakaaladahaan Soo Wada Xaqiijiyay Wasaarada Arimaha Dibada Ee D.F.Soomalia iyo Maxkamada Rafcaanka ee Gobolka Banaadir 3-) Wakalad Ref No.DIW/AA/210535/21 Tr. 29/05/2021 Kana Soo baxday Xafiska CNA Solicitors Una Saxiixay Avv.C/raxmaan Axmed-Nuur Cali , in ay maamuli Karaan, dhaxalkoob u samayn Karaan, xafidi Karaan, gadi Karaan, Hibeyn Karaan, Wareejin Karaan, Qofkasta Qismigiisa Ku Wareejin Karaan, dhisi Karaan, kireyn Karaan, ka saari Karaan, saxiixi Karaan kaalintooda, una doodi Karaan una dacwoon Karaan oo qareen u qaban Karaan, Maxkamadaha dalka hortooda u matali Karaan qof waliba qismiga uu ku leeyahay dhamaan hantida dhaxalka ah oo ay ka dhaxleen Marxuuminta Kala ah 1- C/QAADIR KHEYRE CALI iyo C/llaahi Kheyre Cali.

DAMIINU MAAL

1-Cali Xuseen Cawaale & 2- Abshir Macalin Abuukar, Waxay Maxkamadda Ka Hor Cadeeyeen in ay Damiinul Maal Buuxa ka Yihiin, Wixii Ka Yimaada Dhaxaltooyada Sare Ku Xusan Hadii ay Dhacdo in ay Qariyaan Qof Ka Mid ah Dhaxaltooyada ama ay noqon waayaan dadka sare ku xusan Kuwii Dhabta ahaa, Masuul Buuxana ay Ka Yihiin Wixii Ka Yimaada Dhaxaltooyada Wakaalada Sare Ku Xusan Soo diray.



=SAXIIXA MARKHAATIYAASHA=

1- CALI XUSEEN CAWAALE

2- ABSHIR MACALIN ABUUKAR

=SAXIIXA WAKIILADA DHAXALTOOYADA KANA MIDA DHAXALKA=

ISTAAHIL AXMED YUUSUF

SAADAQ C/LAAHI KHAYRE

=SAXIIXA QOFKA MIDA DHAXATOOPYADA=

SAFIYO C/LAAHI KHEYRE

SUGITAANKA MAXKAMADDA.

Maxkamadda Markay Aragtay Codsiga dhaxaltooyadda, Markay dhageysatay marag furka Markhaatiyaasha, Markay aragtay dukumintiga Dhulka, ee uu marxuumka ku qoran yahay, Markay aragtay Wakaaladaha sare ku xusan, Waxay Maxkamada Degmadda Wadajir sugeysaa geerida MARXUUMINTA Kala ah C/QAADIR KHEYRE CALI & C/Ilaahi Khayre Cali oo ay dhaxalkooda leeyihiin dadka sare ku xusan oo kaliya, waxay kaloo Maxkamaddu sugeysaa in Dhamaan Dhaxaltooyada ay Wakiisheen Istaahil Axmed Yuusuf iyo Saadaq C/Ilaahi Khayre ayna Wakiil buuxa u yihiin Dhamaan dhaxaltooyada, isla markaana ay awood buuxda u leeyihiin ku tasarufka Hantida ay ka dhaxleen MARXUUMINTA KALA AH C/QAADIR KHEYRE CALI & C/LAAHI KHAYRE CALI , ee sare ku xusan, Waana Sugitaan dhaxalkoob iyo Wakaalad ansax ah waafaqsan Sharciga Islaamka iyo qaanuunka dalka, Waxaana lagu qoray diiwaanka guud ee mucaamilaadka.

KAALIYAHA MAXKAMADDA.

C/risaaq Cali Cabdi "Caabi"

GARSOORAHA MAXKAMADDA DEGMADA WADAJIR.

Dr. Axmed Maxamed Cali



